# Baadhitaanadda lagu sameeyo dhallaanka marka ay dhashaan ee lagu baadhayo cuduradda naadirka ah

*(VasSeu-baadhitaanka sheybaadhka)*

*Caduradaas aan badneyn ee baadhitaanadda lagu sameynayo waxaan ku boorineynaa dhammaan dhallaanka yaryar ee dhasha oo dhan (Arimaha bulshada iyo caafimaadka 7.4.2014). Sida la qiimeeyey saddexdii dhallaanba hal ayaa laga helaa cudur ka mid ah cuduraddan marka lagu sameeyo baadhitaannadan, cudurkaas oo ah mid keenaya waxyeelo joogta ah waxaanan kaga hor tagi karnaa marka horey loogu bilaabo daaweynta. Baadhitaankan la'aantiis cuduradan si dhakhsa ah u helitaankooda ama ogaanshahoodu inta badan ma ahan suurtogal. Waddamo badan oo reer galbeedka ahi baadhitaanaddan kuwo u dhigma oo lagu sameynayo carruurta dhalata waxaa laga bilaabeyba sannado ka hor.*

Cudurradan qashinsaarka ku dhaca ee halista ah laguna soo dhasho carruurta qabaa marka ay dhashaan waxay u muuqdaan kuwo caafimaadkoodu buuxo. Cuduradan aan badneyn calaamadahooda ugu horeeya waxaa lagu baadhaa baadhitaankan, kaas oo cudurka lagu dareemi karo daawadiisana lagu bilaabi karo xilli habboon oo degdeg ah. Kuwa dawadoodda sida dhakhsaha ah loogu bilaabo oo keliya ayaa lagaga hor tagi karaa in uusan ilmaha ku dhicin curyaanimo/ naafo joogto ah amaba dhimasho.

Baadhitaanku waa mid fudud: *Waxaana laga sameeyaa dhowr dhibcood oo dhiig ah, kuwaas oo lagaga soo nuugo xaanshi cidhibta ilmaha oo la durey marka ay ilmaha da'adiisu tahay 2-5 caanomaal.* Haddii baadhitaanka natiijadiisu aaney aheyn caadi, sida ugu dhakhsaha badan ayaa cisbutaalku waalidka ula soo xidhiidhayaa. Ilmaha yarna waxaa laga qaadayaa baadhitaan cusub si loo helo cadeymo dheeraad ah awgeed, dhakhtarka ayaana baadhaya caafimaadka ilmaha. Carruurta badankoodu baadhitaankan xidhiidhka ah ee lagu sameeyo laftiisu wuxuu u muuqan karaa caafimaad qab. Haddiise natiijadda jawaabtu ay tahay caadi lama soo sheegayo, balse natiijada waxaa laga arki karaa OmaKanta.

Baadhitaankan carruurtu marka ay dhashaan lagu sameeyaa wuxuu caawinayaa in laga hortaggo cudradda qaarkood dhibaatooyinkooda, kuwaas oo ah kuwa lagu dhasho ee la daaweyn karo. Carruurtan qaarkooda tirada yare ee qaba cuduraddan mid ka mid ahi, baadhitaankan iyo xanuunkooda oo horey loo ogaadaa waxay badbaadin karaan ilmahaas noloshiisa oo dhan.

*Waxaa ku jira oo la socda warbixinno muhiim ah oo ah baadhitaanka jirrooyinkan. Wixii warbixin dheeraad ah sidoo kale waxaad ka heli kartaa [www.saske.fi](http://www.saske.fi).*



## Muhiim!

Baadhitaanka sheybaadhka waxaa badanaa lagu qaadaa qaybta jiifka ee umusha marka ay ilmaha da'adiisu tahay 2-5 caana maal oo ah 48-120 saacadood. Haddii aad cisbitaalka ka baxdid ilmaha oo da'adiisu tahay 36-48 saacadood, baadhitaankan waxaad qaadi kartaa xilligaad baxaysid. Haddii aad cisbitaalka ka baxdid ilmaha oo aan da'adiisu gaadhin 36 saacadood, sheybaadhka waxaa lagu qaadayaa ballan khaas ah markuu ilmuhu yahay 48-120 saacadood. Wixii tusaaley dheeraad ah ee la xidhiidha baadhitankan ee aad u baahan tahay waxaad ka heli kartaa cisbitaalka lagu dhalo/ umulo dhakhaatiirtiisa carruurta qaabilsan.

## Warbixinta xanuunadda la baadhi karo:

*Howl gabkaqanjidhka dheecaanada jidhka maamula (kilpirauhanen)* waa marka uu howsha gabo/yareeyo (hypotyreoosi) taas oo ay keento qanjidhkaas oo dheecaankiisu ka yaraado jidhka. Dheecaanka qanjidhkaasi waa mid carruurta korriinkoodda iyo kobcidooddaba u ah lagama maarmaan. Sanadka noloshiisa ugu horeysa ka maqnaanshaha dheecaankaasi jidhka ka maqan yahay waxay ku keentaa ilmahaas khalkhal koritaan oo halis ah iyo naafo . Haddii ilmaha horey looga ogaado jiradan oo isla usbuuca noloshiisa ugu horeysaba lagu bilaabo daaweynta qanjidhkaas dheecaankiisa oo daawo ah ilmahaasi si caadi ah ayuu u korayaa una kobcayaa. Finland ku dhalashada howl gabka qanjidhkaasi waxaa laga helaa carruurta dhalata ilaa iyo 1:2000–1:3500. Cudurkan inta la iska dhaxlo ama la iska hideystaa waa mid aad u yar.

*Kelyaha oo cad dheeri ihi ka soo baxo ama ku abuurmo* waa haddii ay abuuranto keli dheeraad ihi (CAH) waxay keentaa qolofeysiga kelida dheeraadka ah oo ah khalad ku yimaada dheecaanka streoidiga soo saarkiisa. Dheecaanadani waxay qeyb weyn ka qaataan howlaha unugyada muhiimka ah ee jidhka sida sokorta-, cusbada-, iyo dheelitirka dareerayaasha jidhka ku jira. Daawo la'aantu ilmaha waxay ku keeni kartaa in ay qaabeysmaan jirrooyin halis ahi amaba dhimasho ay timaado haddii ay khalkhal galaan cusbada- iyo dheelitirka dareerayaasha jidhka ku jiraa. Cudurku sidoo kale wuxuu kordhiyaa soo saarista dheecaanadda ragga. Cad dheeraad ah oo kelida ka soo baxo oo lagu dhashaa wuxuu ka soo if baxaa carruuraha dhasha ilaa iyo 1:15 000–1:20 000 CAH-cudurkan waxaa lagu daweeyaa dheecaankan maqan oo lagu kabo dawooyin, kaas oo u ogolaanaya bukaanka inuu ku noolaado nolol caadi ah

*Yaraanshaha aadka ah ee difaaca jirka oo wadajirka ah (SCID)* waa cillad la iska dhaxlo ooh hab-dhiska difaaca jidku xumaado. Cilladan awgeed iska-difaacidda ilmaha ee cudurrada halista ah ayaa daciifay, haddii aan la daaweynna cudurku wuxuu badanaa keenaa dhimashada ilmaha labada sano ee ugu horreeya noloshiisa. Inta badan carruurta waxaa lagu daweyn karaa tallaalka unugyada nooca jirrideedyada ah haddii cudurka la ogaado oo la daweeyo ka hor intaysan caabuqa dhicin. Cilladan waxaa Finland laga helaa ila iyo 1:50 000–1:100 000.

*Baadhitaankan sidoo kale waxaa lagu baadhaa cuduro kale oo tiro leh cuduradda aan badneyn ee amoniyada- iyo qashinsaarka dufanka iyo aysiidha dabiicigga ah oo urrutey cuduradda ay keento* (tusaale ahaan PKU, LCHADD, MCADD ama GA1). Warbixin hubaal ah oo cuduraddan guud ahaantooda ah oo Finland ah lama hayo laakiin waxaa la qiimeeyey, in wadankeena sanad walba ay ku dhashaan tobonaan- carruur ah, kuwaas oo ku jira kooxahan cuduradan aan sheegney. Cuduraddan waxaa lagu daweeyaa cuntooyin khaas ah iyo iyadoo la adeegsanayo nafaqooyin-diyaarsan. Cudurrada qaarkood waxay leeyihiin dawooyin.

Caduraddan la baadhi karaa inta badan waxay keenaan khalkhalo halis ah oo ku dhaca qashinsaarka jidhka. Waxaa khalkhal ku dhici karaa soo saarista tabarta jidhka ama waxaa unnugyadda jidhka ku ururi kara walaxyo sun ah. Calaamadana waxaa u noqon kara sida. matag, korriin xumo, curyaanimo amaba dhimasho. Waxaa la aaminsan yahay, in dhimashada dhallaanka 5% ay keenaan cuduraddanku dhaca qashinsaarka- jidhka ee lagu soo dhasho. Inta ugu badan cudurradan la baadhi karaa waxay leeyihiin dawooyin awood leh oo waxqabadkoodu tayeysan yahay haddii wakhti hore la bilaabo. Saadaalinta jiritaanka cuduraddani waxay ku xidhan yihiin, dhaawacyo intee le'eg ayey geysteen inta aanan daaweynta lagu bilaabin.

Sida qaalibka ah cuduraddan la baadhi karaa si dahsoon ayaa la iskaga hideystaa ama dhaxlaa. Sidan ayeyna isbedeladda ay sameeyaan iska dhaxliddu oo looga jeedo burburka ama isbedelka ay isugu gudbiyaan jiil ka jiil cudurkuna wuxuu soo shaac baxaa, marka ay labo side iska dhalaan cunnug oo ay labaduba u gudbiyaan isbedelkaas faracoodda. Lammaane kasta oo isbedel side ah cunnug kasta oo u calool gala wuxuu halis u yahay 25% in ay dhallaan cunnug jirran.